

Bas kuu imaan doono!

Ku xidhnoow Metro micro.
Wuxuu ku yaalaa xaafadaada.

Waxaa jira adeeg cusub oo laga heli karo aaggaaga laga bilaabo Sebteembar 15. Metro Micro waa adeeg gaadiid oo qiima jaban oo si fudud loo isticmaali karo. Waxay kaa caawinaysaa inaad ku safarto baska kuu dhow ama jidadka tareenada, ama aad safaro gaagaaban ku aado agagaarka Northtown, oo ay ku jiraan meelaha Blaine, Coon Rapids, iyo Spring Lake Park.

Metro micro waxay ku lammaanaysaa raaxada iyo haboonaanta gaadiidka gaarka ah inuu yahay mid hufan oo la wadaagi karo.

WAY SAHLAN TAHAY IN LA ISTICMAALO:

Si fudud u dalbo gaadiid adiga oo soo dejiisanaya ablikeeshinka Metro micro ama wacaya 651-602-1170. Waxaan ku soo diri doonaa wakhtiga dhabta ah baska yar ee kuugu dhow si lagu soo qaado laguuna geeyo meel kasta oo ah aagga adeega laga bixiyo.

SAACADAHA LA SHAQEEYO:

Isniin-Jimco: 5:30 a.m. – 10:30 p.m.

Sabti iyo Axad: 7 a.m. – 10:30 p.m.

Saacadaha la shaqeeyo xilliga fasaxa way kala duwanaan karaan.

WAA LA AWOODI KARAA:

Nooligu waa \$2.50/\$3.25, iyadoo ku xidhan wakhtiga maalinta. Ku bixi lacag caddaan ah tigidhada, Kaarka Go-To Card ama baaska, ama ablikeeshinka Metro Transit. Ku beddelashada basaska iyo tareenada waa lacag la'aan muddo dhan 2 ½ saacadood.

SIDA AY U SHAQAYSO

- Kasoo dagso ablikeeshinka Metro micro App Store ama Google Play. Ma haysatid miyaa taleefan casri ah? Naga soo wac 651-602-1170
- Ku sameyso akoon lambarkaaga talefanka iyo ciwaanada iimaylka
- Balanso gaadiid, ha lagu soo qaado, ka dibna aad meel kasta, oo lagu bixiyo adeega

